


Bixiyayaasha Adeegyada ka ilaalinta cimilada guriga (weatherization) ee Minnesota

Laga bilaabo Luulyo 1, 2019

- Arrowhead Economic Opportunity Agency, Inc. (Virginia)
- Bi-County Community Action
- Community Action Partnership of Ramsey & Washington Counties (Saint Paul)
- Dakota County Community Development Agency (Eagan)
- Fond Du Lac Reservation Business Committee (Cloquet)
- Inter-County Community Council (Oklee)
- KOOTASCA Community Action, Inc. (Grand Rapids)
- Lakes and Pines Community Action
- Mahube-OTWA Community Action
- Mille Lacs Band of Ojibwe Indians (Onamia)
- Minnesota Valley Action Council
- Northwest Community Action, Inc. (Badger)
- Prairie Five Community Action Council, Inc. (Montevideo)
- Semcac (Rushford)
- Southwestern Minnesota Opportunity Council, Inc. (Worthington)
- Sustainable Resources Center (Minneapolis)
- Three Rivers Community Action, Inc. (Zumbrota)
- Tri-County Action Programs, Inc. (SC) (Waite Park)
- Tri-County Community Action, Inc. (LF) (Little Falls)
- United Community Action Partnership (Marshall)
- West Central Minnesota Communities Action, Inc. (Elbow Lake)
- White Earth Reservation Tribal Council (White Earth)



Si aad u hesho macluumaadka liistada hadda jirta ee Bixiyayaasha iyo ka ilaalinta cimilada guriga, booqo mn.gov/commerce ama la xiriir Xarunta Macluumaadka Tamarta (Energy Information Center), energy.info@state.mn.us 651-539-1886 or 800-657-3710 (Greater Minnesota)

mn COMMERCE DEPARTMENT
 DIVISION OF ENERGY RESOURCES
 Energy Information Center
 1-800-657-3710
energy.info@state.mn.us
mn.gov/commerce



Barnaamijka Caawinta Jawiyaynta Minnesota

Yoolkayaga/Hawgalkeena:

“Inaanu hoos u dhigno kharashka kaga baxa tamarta qoysaska dakhligoodu hooseeyo, qaas ahaan dadka da’da weyn, dadka naafada ah, iyo dadka caruurta leh, annagoo hagaajineyna wax ku oolka tamarta ee guryhooda isla markaana hubineyno badbadooda iyo caafimaadkooda”

mn COMMERCE DEPARTMENT
 DIVISION OF ENERGY RESOURCES

Waa maxay Ka Ilaalinta Cimilada Guriga (Weatherization)?

Waa barnaamij ku caaminaya milkiilayaasha-guri ama kiraystayaasha ee dakhligooda hooseeya ee Minnesota inay helaan kor u qaadista tamarta iyo adeegyo ay si joogto ah ugu dhimayaan biilasha tamarta kuna hubinayaan badbaadada guryahooda. Barnaamijku wuxu ogolaansho ka haystaa Waaxda Tamarta ee Maraykanka waxaana intiisa badan maalgeliyay Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Adamaha ee Maraykanka, waxaana maamula Waaxda Ganacsiga ee Minnesota iyadoo la shaqaynaysa shabakad ka kooban 23 bixiyayaal adeeg ee maxalli ah.

Yaa loogu talagalay?

Barnaamijka Caawinta ka ilaalinta cimilada guri (Weatherization) waxa uu u adeegayaa qoysaska ka hooseeya 200% tilmaaha dakhliga federaaliga, iyadoo mudnaanta la siinayo qoysaska leh xubno qoska ka mid ah ee da'da weyn, ama naafo ah, caruur leh ama kuwa tamar badan isticmaala.

Sidee buu ii caawinayaa?

Hadii aad u qalanto, bixiye adeeg eemaxali ah ayaa baaris bilaash ah ku sameenaya gurigaaga si uu u go'aamiyo hagaajinta wax ku oolka tamarta ee qiimaha jaban ee gurigaaga laga qaban karo. Adeegyada ka ilaalinta cimilada guriga (weatherization) waxay hoos u dhigi karaan kharashka sanadkiiba ku baxa tamarta ee gurigaaga ilaa iyo boqolkiiba 30 (30%). Kor u qaadista tamarta ee suurtoogalka ah waxaa ka mid ah:

- Hawo siidaynta oo la dhimo
- Dahaar gidaarka/darbiga dibada ah iyo mid saqafka ah
- Bedelista ama hagaajinta kulayliyaha, bayliyaha iyo biyo diiriyaha
- Heerkul xaddide cusub oo la barogaraamin karo
- Alaam/qalabka digniinta qiiqa/dabka ee cusub iyo dareeme garata kaarboon moono oksayd

“Ka ilaalinta cimilada guriga (Weatherization) waxaa laga yaabaa inay ahayd Hadyada Kirismiska ee ugu fiicnaa ee aan waligay helay. Waxay ahayd faraj rabbaani run ah Hadda aad baan u diiranahay jiilaalka, hawada qaboob na si aad uga fiican sidii hore ayay gudaha ugu sii jirtaa xagaagii. Biilkaygii shidaalku kala bar buu hoos u dhacay, biilkeyga korantadana 25% ilaa 40% ayuu bil kasta hoos u dhacay.”

—Steve Koelln, Qof ka ilaalinta cimilada guriga helay,
Spring Hill Township



qabtay. Tamar hagaajinta ka hor, gurigaygu waxa uu ahaa qabaw iyo dhaxan. Laakiinse hadda aad buu sidii hore uga raaxo iyo badbaado badan yahay. [Shaqaalaha Ka ilaalinta cimilada guriga] ee jooga Sustainable Resources Center si aad u fiican bay iila dhaqmeen. Waxay iga caawinayaan inaan gurigayga si fiican ugu noolaado, taaso oo aan weligay ugu mahadcelin.

—Juan Bolanos, Qof helay Jawiyaynta,
South Minneapolis



Sidee baan u codsan karaa adeeg?

Dadka dakhliga hooseeya ee Reer Minnesota waxay caawinta ka ilaalinta cimilada guri (weatherization) u codsan karaan iyagoo codsi isku jir ah u diraya Barnaamijka Caawinta Tamarta ee gobolka (kaa soo mulkiilayasha-guri iyo kiraystayaasha ka caawiya bixinta biilasha kulaylinta). Codsadayaasha waa inay aqoonsadaan cidda adeegaas ka bixisa aagooda, buuxiyaan foomka codsashada, una diraan bixiyahooda adeegaas. Booqo bogga wabsaytka WAP ee mn.gov/commerce ama wac **1-800-657-3710** si aad u ogaato bixiyahaaga adeega oo aad uga dalbato foomka codsiga.